


| | |
|---|---|
| **Ibraahim:** | Saaxiib, Macallimiinta Islaamku waxay i bareen in fursadda ugu weyn ee janno aan ku galikaro ay tahay samaynta camallo wanaagsan, laakiin ma garanayo haddii aan sameeyay camal igu filan si Alle uu ugu qanco. |
| **Aamin:** | Ibraahim, waan ku faraxsanahay inaad ii timid. Maxay tahay su'aashaadu? |
| **Ibraahim:** | Camallada wanaagsan ee aan sameeyo: salaadaha, sadaqada iyo soonka… Ma i badbaadin karaan? |
| **Aamin:** | Maxay kaa badbaadin karaan? |
| **Ibraahim:** | Ma kuwaasi ayaa iga badbaadin kara jahannamo? |
| **Aamin:** | Si aan kaaga jawaabo, waa inaan ku weydiiyo: Maxay kula tahay in lagu ciqaabay kuwa jahannamada galay? |
| **Ibraahim:** | Inay ahaayeen Beenaalayaal, khamri cabayaal, zinaystayaal, dilaayaal, gaalo, sanam caabudayaal, cay, iyo inay ahaayeen kuwo uusan ilaah u dooran janno. |
| **Aamin:** | Hagaag, laakiin maxay tahay saldhigga garsoorka Alle? |
| **Ibraahim:** | Camalladaada ayay ku salaysantahay. |
| **Aamin:** | Laakiin waa maxay heerka uu ugu garsooro qof walba? |
| **Ibraahim:** | Ma garanayo. |
| **Aamin:** | Waa Sharciga Ilaah. Sharciga Ilaah waxaa markii ugu horreysay lagu siiyey Muuse Buurta Sinai 3500 oo sano ka hor, qoraalkiisana waxaa laga helaa Tawreedka Muuse. |
| **Ibraahim:** | Waa maxay sharcigan? Waligay ma maqlin… |
| **Aamin:** | Haa waad taqaan, sababtoo ah Alle wuxuu sharcigan ku qoray qalbigaaga — markaad maqashana waad garan doontaa. Sida Rasuulka yashuucu yidhi: |

"Markii dadka aan Yuhuudda ahayn oo aan sharciga lahaynu, ay dabiicadda ka sameeyaan waxyaalaha sharciga, kuwan aan sharciga lahaynu waa isu sharci.

Waxay muujiyaan shuqulka sharciga oo qalbiyadooda ku qoran, iyagoo garashadoodu u markhaati furayso, oo fikirradoodu midba midka kale ashtakaynayo ama marmarsiinyo samaysanayo." (Rooma 2:14–15) Tani waa sharciga aad maalin walba dadka kale ku xukunto—laakiin waa sharciga adiga lagugu xukumi doono.

**Ibraahim:** Waa maxay Sharcigaas? Sideen u ogaan karaa haddii aan u hoggaansamay?

**Aamin:** Aan tijaabino si aan u aragno waxa dhici lahaa haddii Alle kugu xukumo sharcigiisa.

**Ibraahim:** Waxan ahay diyaar.

**Aamin:** Waligaa noloshaada waxyar ma xaday?

**Ibraahim:** Haa, marar dhowr ah.

**Aamin:** Amar-kii 7aad wuxuu leeyahay:"Ha xadin." (Baxniin 20:15). Maxaad u taqaan qofka wax xaday?

**Ibraahim:** Tuug.

**Aamin:** Ma sameysay zino?

**Ibraahim:** Maya.

**Aamin:** Laakiin markii Ilaah uu sharxay amarkii 6aad wuxuu leeyahay: "Laakiin waxaan idinku leeyahay, Nin walba oo qof dumar ah damac u eegaa, durba qalbigiisuu kaga sinaystay." (Matayos 5:28). Miyaad taas sameysay?

**Ibraahim:** Haa, maalin walba. Waxaan ahay bini'aadam.

**Aamin:** Markaad maxkamadda Alle aad joogto,waxaad la seexatay dumar badan. Maxaad u taqaanaa qofka sidaas sameeya?

**Ibraahim:** Sinayste.

**Aamin:** Waligaa magaca Ilaahay si xun ma u adeegsatay?

**Ibraahim:** Haa.

**Aamin:** Waxaad jebisay amar-kii 2aad—taasi waa caayista magaca Alle, oo ah cay aad u daran. Miyaad waligaa qof Hooyadii iyo Aabbihii cayday?

**Ibraahim:** Maya.

**Aamin:** Waligaa ma jeclaatay intaad jeceshahay Alle in ka badan—lacag, cunto?Ama adiga naftaada? Si daacada iigu sheeg.

**Ibraahim:** Haa.

**Aamin:** Markaas waad jebisay amar-kii 1aad: "Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan.." (Baxniin 20:3). Waxaad jeclaatay naftaada in ka badan alle—taasi waa caabudid nafsi ah. Maxaad u taqaanaa qofka calaabuda cidaan Ilaahay ahayn?

**Ibraahim:** Sanamyo caabude. Laakiin anigu ma caabudin Ilaah kale.

**Aamin:** Amar Ilaah wuxuu leeyahay: "

Maqal, Israa'iilow, Rabbiga Ilaaheenna ahu waa Rabbi keliya.Waa inaad Rabbiga Ilaahaaga ah ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan iyo naftaada oo dhan iyo xooggaaga oo dhan.

(Sharciga ku noqoshadiisa 6:4_5)". Haddii aad wax ka jeclaatay Alle—xitaa naftaada—taasi waa sanm caabudid. Waxaan hubaa inaad sidaas sameysid maalin kasta—sanam caabudistu qalbigay ka timaada, ma aha uun ficilka muuqda.

**Ibraahim:** Waa culays in la maqlo, laakiin qof walba wuu sameeyaa.

**Aamin:** Runtii waad saxan tahay, laakiin hadda adiga ayaan kaa hadlaynaa. Adigu waxaad taagan tahay maxkamadda Alle, xukunku wuxuu ku salaysan yahay camalka. Sharcigu laynooma siin si aan igu ogaano inaan wanaagsannahay, balse in layna tuso inaan dambiilayaal nahay—sida mashiinka x-raygu, qalbigaaga u baadhayo. Markaa waxaad sheegtay inaad tahay tuug,saani, caaye, sanam caabude—maxaad u malaynaysaa waxa kugu dhici doona?

**Ibraahim:** Waxaan u malaynayaa inaan lay cadaabayn waayo, dambigaygu uma weyna sida ka dadkaas.

**Aamin:** Qof walba wuu iska sarray siin karaa marka la barbar dhigo dadka kale, laakiin xukunka Ilaah wuxuu ku salaysan yahay Sharcigiisa Quduuska ah. Marka naftaada dadka kale ha barbar dhigin. Ilaah wuxuu yidhi: “mushaharka dembiga waa dhimasho.” (Rooma 6:23). Tani waxay muujineysaa in camalkaagu muhiimad weyn kuu leedahay—mushaharka dembiga ayaa ku sugaya. Waxaad dadka kale xukuntay adigoo leh: “Wey u qalmaan jahannamo.” Laakiin adigu waxaad si qarsoodi ah u sameysay waxaad ku eedaysay iyaga. Taasi waa sababta Ilaah u yidhi: “Sidaas daraaddeed, nin yahow, marmarsiinyo ma lihid ku kastoo aad tahayba kaaga wax xukuma; maxaa yeelay, meeshii aad ku kale ku xukuntid, waad isku xukumaysaa, waayo, kaaga wax xukumaa, waxaad samaysaa isla wixii.” (Rooma 2:1).

Haddii sharciga Ilaah la gugu xukumo, saw caddaalad maaha oo dembiile ma tihid?

**Ibraahim:** Waxaan ahay dembiile laakiin dambiyadaydu ma weyna.

**Aamin:** Saaxiib,dhakhtarku markuu kuu sheego inaad kansar qabtid, ma odhanaysaa: “Dhib ma leh, caafimaad baan dareemayaa”? Sidoo kale Alle Xukunkiisu wuxuu ku salaysan yahay Sharcigiisa, adiguna waad jebisay—waxaadna odhanaysaa: “waxaan kaloo sameeyay camallo wanaagsan.”

Marka haddii Ilaah kugu xukumo Sharcigiisa, ma jannatul fardawsbaad sugaysaa ama jahannamo?

**Ibraahim:** Haddii uu sharci igu xukumo, waxaan u malaynayaa jahannamo.

**Aamin:** Taasi waa jawaabta. Camalladayda wanaagsani ma i badbaadin karaan? Sharciga Ilaah wuxuu kuu muujiyey inaad dambiile tahay. Qorniinku wuxuu leeyahay“Mid wax garanayaa ma jiro; Mid Ilaah doondoonaa ma jiro;Dhammaantood gees bay u wada leexdeen, waxay wada noqdeen wax aan wax tar lahayn; Mid wanaag falaa ma jiro, midnaba.” (Rooma 3:11–12). Sharcigu wuxuu caddeeyey inaad dambiile tahay.

**Ibraahim:** Laakiin Ilaah miyuu miisaami doonaa camalladayda wanaagsan ama camaladayda xun?

**Aamin:** Camalka wanaagsan ee aad samaysay? Waxay ku xidhan yahay ilaalinta Sharciga Quduuska ah. Sharcigu wuxuu hore kuu sheegay inaad dambiile tahay.*Iska ilaali inaad is khiyaantid.* Sharciga Ilaah wuxuu sheegay: “Waayo, kulligayo waxaannu noqonnay sida wax aan nadiif ahayn, oo xaqnimadayada oo dhammuna waa sida dhar wasakh ah, kulligayona waxaannu u engegnay sida caleen oo kale, oo xumaantayadiina sidii dabayl oo kale ayay noo kaxaysataa.” (Ishacyaah 64:6).

**Ibraahim:** Haddii aanay camalladaydu i badbaadin karin, maxaan sameeyaa si aan u badbaado?

**Aamin:** Waa su’aal fiican. Waqti badan ayay igu qaatay inaan ku tuso inaad bukto ood u baahan tahay dhakhtar.

**Ibraahim:** Waa sax, waxaan jebiyey sharciyadii Ilaah.

**Aamin:** Haddaba, saaxiib, bal ii ogolow inaan kuu sheego Dhakhtarka ku bogsiinaya: **Alle wuxuu bixiyey Badbaadiye.** Isaga keliya ayaa ku siin kara caddaaladda loo baahan yahay si laguu aqbalo, isagoo keliya ayaa bixiyey ciqaabta dembigaaga.

**Ibraahim:** Laakiin sidee buu qof kale dembigayga u bixin karaa?

**Aamin:** Haddii aad baabuur xado, garsooruha maxkamaddu wuxuu kaa dalbanayaa $5000 si aad xabsiga uga baxdo, haddii aadan haysan, saaxiibkaa ma kaa bixin karaa?

**Ibraahim:** Haa, wuu bixin karaa.

**Aamin:** Taasi waa sharci. Haddaba haddii Alle doonayo inuu kuu muujiyo jacaylkiisa, isagu ma bixin karaa ciqaabta dembigaaga?

**Ibraahim:** Haa wuu bixin karaa. Laakiin muxuu Alle iigu samaynayaa sidaas?

**Aamin:** Waa Jacaylkiisa dembiilaha… **Yeshuuca Masiix wuxuu adduunka u yimid si uu dembiilayaasha u badbaadiyo.**

Yashuuca ilaah waa badbaadiyaha dunida Sida Nebi Yooxanaa yidhi: "Maalintii labaad Yooxanaa wuxuu arkay Ciise oo ku soo socda, oo wuxuu yidhi, Bal eega Wanka Ilaah ee dembiga dunida qaadaya." (Yooxanaa 1:29). Sidii Malag jibriil usheegay Yuusuf: "Waxay dhalin doontaa wiil, waxaadna u bixin doontaa Yeshuuca, maadaama uu dadka ka badbaadin doono dembiyadooda." (Matayos 1:21). Wuxuu u yimid inuu dadkiisa badbaadiyo dembiyadooda.Yeshuuca Masiix wuxuu yidhi"Ciise goortuu maqlay ayuu ku yidhi, Kuwa ladan dhakhtar uma baahna, laakiin kuwa buka ayaa u baahan. Uma aan imanin inaan kuwa xaqa ah u yeedho, laakiin inaan dembilayaasha u yeedho ayaan u imid." (Markos 2:17). Saaxiib, adigu waxaad tahay dambiile.dhakhtarkad u baahan tahay waa yashua ilaah
Haddaba sidee ayuu u badbaadiyay dadkiisa? Rasuulka Paul wuxuu yidhi: "Masiix wuxuu inaga furtay inkaartii sharciga, isagoo inkaar inoo noqday, waayo, waxaa qoran, Mid kasta oo geed ka soo deldelanu wuu inkaaran yahay.'" (Galatiyaal 3:13)

sidoo kale Rasuul yooxanaa wuxuu yidhi:"Haddaba markii Ciise khalkii qaatay ayuu yidhi, Waa dhammaatay, markaasuu madaxa foororshay oo ruuxii bixiyey." (Yooxanaa 19:30). Yeshuucu yidhi:
"in mid kastoo isaga(Yashuca) rumaystaa uu lahaado nolosha weligeed ah." (Yooxanaa 3:15).

"Qorniinka ayaad baadhaan, waayo, waxaad u malaynaysaan inaad nolosha weligeed ah ka helaysaan, waana iyaga kuwa ii marag furayaa

Idinkuna dooni maysaan inaad ii timaadaan inaad nolol lahaataan." (Yooxanaa 5:39–40).

"Ciise ayaa ku yidhi, Anigu waxaan ahay sarakicidda iyo nolosha. Kii i rumaystaa, in kastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa." (Yooxanaa 11:25).

**Saaxiib, camalladaada wanaagsani kuma badbaadin karaan—keliya Yeshuuca ayaa ku badbaadin kara.** Rumayso maanta, nolosha Ilaah ayaad heli doontaa.